
Ku Baadh Telegramka @Somalibooks



Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Hordhac

Buuggan waxaan laga soo tarjumay buug uu qoray qoraa faransiis ah muddo shan boqol oo sano ka hor xilli waddanka faransiiska uu marayay xaalad kala guur iyo is qabqabsi ku salaysan xukumida waddankaa.

Taariikh kooban iyo kacaanadii waddanka Somaliya:

Waxaan soo aragnay haddaan soomaali nahay, Siyaad barre oo laayey dadkay iskula jireen inqilaabka sida, Gabayre & Caynaanshe, oo markii taa laga yeelay u gudbay wixii ciidamo ahaana isu bedeleen mallaysio beeleed uu u adeegsado inay isaga kursigiisa u difaacaan, howshaani waxay billowday dhibaatooyin badan oo la kulantay somalidii rayidka ahayd ee ku noolayd gobollada waqooyi, iyo waddanka intiisa kale.

Waxaa ku xigay kuwii kacaanka ee Caydiid, Cali mahdi, Jees, maadaama fashil, qabyaalad iyo khilaaf ay ku colloobeen qolyahii ku midaysnaa cayrinta siyaad barre, ayaa suurto galisay siyaad iyo morgan ay helaan marmarsiiyo ay siyaasada ku soo noqdaan.

Waxaa ku xigay, askarta maraykanka oo qarash iyo howl badan ka heli jiray la dagaallanka shuuciyaddii ka jirtay ruushka oo markii taasi sababo dhaqaale darteed u burburtay ay noqotay, inay waxa ay shaqo ka dhigtaan ka soo doontaan Somaliya, kadibna go,aansaday inay isaga tagaan.

Markii is xagxagasho, dagaal qabiil, xoog iyo muran toona la isku mari waayay, ayay fursad ku heleen hoggaamiyo kooxeedyo soo if baxay ummada isbaarooyin iyo boob ku dhibaayeeyaan.

Waxaa rogaal celin ay maxkamadihii sameeyeen, ku kala direen rabsho wadayaashii, laakiin maysan suurto galin in dhaqdhaqaaqu u kobocdo si dabiici ah, daaquudyo heer caalami ah (international community), oo kusoo gabada itoobiya,igad ama UN, oo aan ka marnayn middiyo u aasan, madax jabis. Berigii hore marmarsiiyo ka dhiganayay la dagaal shuuciyad haddan isu bedeshay argagixiso hadafkii taariikh ahaan uu yahay inay qof ay wataan uu wax xukumo ama inay walaaq cusub bilaabayaan.

Ugu danbayntiina daaquud kale ayaa ka soo dhex booday, al shabaab, la magac baxay godane (dhintay 2014) kaliya kuma ekaan inuu laayo saaxiibadiis afgaani iyo al amriki wuxuu ku guulaystay inuu hasan daahir oo quud darraynayay wada shaqayn u cayriyo dhinacii kuwii ka soo horjeeday.

Mala dhihii karaa Somaliya hadda waa xor? Magaalooyin waawayn sida kismayo iyo xamar qofka gurigiisa lagala baxaa oo wixii la rabo lagu sameeyo iyadoo awood la sheeganayo, khaati baa hadda laga jooga kuwa horbooda Somaliland, ka puntland dadka ayuu boob loo bixiyay magaca canshuur ku dhibay. Waxaa ka socda magaalada xamar mudaaharaad looga soo horjeedo boobka ay wadaan qolyo la magac baxay banaadir state way iska caddahay midkasta oo askar qortay inuu jidgooyo iyo canshuuro la yimaado, si uu ugu ceesho qorigiisa.

@somalibooks

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa xusid mudan in si kasta uu dhibku u ragaadiyo somalida haddana balaayadu aysan cirka kama imaan ee dad dhulka jooga qaska masuuliyadeeda leeyihiin, in loo baahan yahay in la darso oo aqoonteedna la faafiyo...umada runta loo sheego oo sida dhabta ah loogu warramo iyadoo tusaalaha fiican la amaanayo; ka khaldanna loo baahan yahay inta farta lagu fiiqo.

Kumuu ahaa Qoraaga buuggan Etienne?

Waxaa kale oo fiirsasho gaar ah u baahan in xilliga Etienne buugga qoray ay ka jireen waddanka faransiska dhaqdhaqaaqyo diimeed oo markaas la dhihi karo dib bay u hagaajiyeen fikirkii laga qabay kitaabka injiilka.

@somalibooks

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Tusmada Buugga

Hordhac 2
Qaybta I 5
Qaybta II 10
Qaybta III 23

@somalibooks

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Qaybta I

Ma arko khayr ka soo socda dhowr madax ah oo ii talisa
Mid kaliya ha ahaado taliye, mid kaliya ha ahaado boqor.

Kelmedahaas ayuu Homer afka Yulisis galiyay, isaga oo u khudbaynaya dadwaynaha. hadduusan waxba ku darin, hadalka "Ma arko khayr ka soo socda dhowr madax ah oo ii talisa" waxay noqon lahayd hadal qumman, waxayna ahayd inuu ku ekeeyo xukun dhowr taliye leh khayr maleh, sababtuna tahay awooda halka shaqsi qudheeda isla marka uu helo magaca taliye guud, wuxuu noqdaa mid dadka silciyo oo gar maqaate ah. Yulisis wuxuu dhahaayo waa daacsi-daacsi.

@somalibooks

"Mid kaliya ha ahaado taliye, mid kaliya ha ahaado boqor". Maahan inaan wax ka sheego Yulisis, waa suurto gal inuu markaas ku qasbanaa kelmedahaas si uu u afjaro amar-diido ciidamadu sameeyeen. sababtaas ayay ila tahay inuu doortay hadal ku jaango'an xaalada degdega ah ee uusan ula jeedin runta inuu ka sheego.

Saas oo ay tahay marka caqliga la fiiriyo waa nasiib darro inaan ka hal taliye ku hoos noolaato sida dabadhilif. hubaal ma noqon karto inuu wanaag la imaanayo oo ay arrintu tahay wuxuu markasta awood u leeyahay inuu axmaqnimo sameeyo hadduu saas raalli kuyahay. Hadaadba dhawr taliye yeelato, taas waxaa loo xisaabin karaa intaasoo kale oo masiibo ah. Inkastoo aanan jeclaysan inaan falanqeeyo su,aashan oo aad looga dooday, magac ahaan in nidaamyo kale oo dawladeed looga door bidi karo boqortooyo haddana waxaa igu habboon inaan ogaado, inta aanan shaki gelin meesha ama booska boqortooyada ay ku leedahay mujtamaca iyo inay ka tirsanaan karto arrintaan kasoo hadalnay oo ay adag tahay in la rumaysto inuu jiro waddan wax kasta uu leeyahay hal taliye. su,aashan dib baa loo dhigan karaa, waxayna u baahan in si gooni ah loo derso taas oo ku lug yeelanaysa qaabka dhammaan doodaha siyaasadeed ee kala duwan.

Haddeerto waxaa igu habboon si sahal ah inaan u fahmo siday ku dhacay in rag badan, iyo tuulooyin badan, iyo magaalooyin badan, iyo qaramo badan, marmar ay ku dhibaatoodaan xukun hal daaquut (madaxweyne axmaq ah). kaas oo aan awood kale lahayn mida ay siiyaan maahane, kaasoo nabar u gaysan kara ku siman inta iyagu ay rabaan inay u xamili karaan. kaaso aan dhaawac u gaysan karin haddii aysan iyagu jeclaysan inay u samraan oo aysan hadal ku soo celin.

Hubaal inay xaalad lala yaabo tahay! haddana waa iska caadi ilaa shaqsigu ay murugadu ku badato, uusan ba iswaydiin markuu arko muuqaalka malaayiin rag ah oo xaalad qarriban ku sugan. oo dhabarka laga rarto sida dibida, waxa dabray maaha dad ka tiro badan laakiin sahal ahaan waxay u egtahay inay ku faraxsan yihiin oo la cajabsan yihiin hal nin magaciisa oo aysan awoodiisa ahayn inay ka baqaan, oo ay iska cad tahay inuu hal shaqsi yahay, kaasoo ay tayadiisa aysan jeclaan karin ay sababtu tahay dadnimo

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

xumada iyo naxariis darrada uu ula dhaqamayo. taag darri lagu yaqaan bani aadamka waxay tahay inaan adeecno xoog; waa in wax la oggolaado; markasta ma ahaan karno kuwa taag roon. Sidaas daaraadeed marka qaran loo xakameeyo dagaal dartiis oo ay tahay in loo adeego koox isku xiran sida dhacday markii magaalada Athens ay ku hoos jirtay soddonka daaquud. La yaab malahan in qaranku adeeco, laakiin si sahlan ayaa looga calool xumaan xaaladan ama sidatan halkii lagala yaabi lahaa ama laga murugoon lahaa, inay tixgaliyaan mustaqbal fiican ay heli doonaan una samraan sharta.

Anaga sideedaba waxay tahay in waajibaad la wadaago, macaamilka xiriirka dadka ay mashquuliyaan qayb aad uwayn oo nolosheena ah, waa macquul in la jeclaado suubanaanta in la qadariyo camalka qumman, in lagu xamdiyo wanaagga meel kasta uu inooga soo unkamo oo ka yimaado iyo badiyaa inaan faraha ka qaadno raaxo si ay sharaf ugu siyaado iyo horumar qof aan jecelnahay oo istaahila. sidaa daraadeed haddii dadka deggan waddan ay helaan shakhsiyad wayn oo tustay fiiro dheer markii ay iska difaacayeen xaalad degdeg ah, caqli dhif ku ah bani-aadamka, oo daryeel huffan oo ay ku maamulaan iyo haddii intaa ka dib isku afgartaan caado ah inay adeecaan ilaa ay gaarsiisan tahay inay u gartaan in shaqsiyadahaas ay u go'aamin karaan bulshada oo dhan waxaan ka baqayaa nidaamkaas inuusan ahayn taxadar iyagoo ka dhaqaajinaya meel uu howl fiican ka hayay una hormarinaya sharaf uu ku samayn karo shar.

Hubaal Haddii uu ku sii wado oo wanaagiisa uu muuqdo, qofna maka baqi doono nabar ka imanaya nin u eg guud ahaan shaqsi qumman.

@somalibooks

Laakiin jooji! Ilaahay amarkii! maxay tahay arrinta fajacisada ah? magacee siinaa? maxay tahay qaabka musiibadaan? Kabaairtee ayay tahay ama dibudhac sidee ah?

In la arko dad badan oo kala har lahayn oo aan ku ekeyn adeecid, laakiin xusul duub badan ugu jira inay addoomo noqdaan? may lama xukumayo ee waa lagu amar ku taaglayn? kuwan sillan ma haystaan maal, qaraabo, xaas iyo carruur, xitaa nolol ma haystaan oo ay dhihi karaan taasaan leeyahay. waxaa kudhaca bililiqo, ka fiirsasho la,aan , axmaqnimo oo aan ahayn tan ciidamada, aan ahayn col dudaya kuwaas oo ay dhiigooda u daadin lahaayeen, noloshoodana ay ku bixin lahaayeen, laakiin waa hal nin, maahan wax rabbaani ah, laakiin waxay ka timid nin waaxid ah oo yar. marar badan ninkaan yar naftiisa waa ka ugu fulaysan haddana naagaystay qaranka oo dhan. Maba yaqaan baaruuda dagaalka, wuxuna faraha ka laabtaa tartannada is reeb-reebka ee ciidaha; maahan inuusan tabar u lahayn inuu am amro rag isagoo xoog istimaalaaya laakiin maba haysto ayaa laga yaabaa awood uu kula seexdo dumarka caadiga ah. ma waxaan dhihi karnaa sandullaynta hoggaamiyahaas fulaynimo iyo wadno jileec?

Haddii labo, haddii saddex, hadii afar ay iska difaaci waayeen halkaas nin waxaan dhihi karnaa arrinkaas waa mid lamafilaan ah laakiin haddana la fahmi karo.
Laakiin haddii boqol, haddii kun, ay ku dhibaatoonayaan is dhalan rogga hal qof ma dhihi karnaa, ma haystaan geesinimo ee waxay la'yihiin rabitaan inay ku kacaan iyo fikirka noocaas waxay tilmaamaysaa inaysan kala jeclayn oo aysan ahayn fulaynimo? marka boqol kabadan, kun kabadan laakiin boqolaal gobollo iyo kumanaan magaalooyin iyo malaayiin rag, ay diidaan inay weeraraan hal nin oo waxa ugu fiican ee laga helo ay tahay addoonsi maxaan taas ugu yeernaa? fulaynimo? runtii danbi kasta wuxuu leeyahay xad uusan dhaafi karin. labo ama toban way ka baqi karaan hal qof laakiin markay kumanaan iyo malaayiin rag ah iyo kumanaan magaalooyin ah ay ka gaabiyaan inay iska difaacaan ayna ka soo horjeestaan in hal nin qabsado tan mala dhihi karo fulaynimo, oo fulaynimo heerkaas ma gaarto sida aan loo dhihin dhiirannaan waa marka hal qof koro xero ciidan uu weeraro is uu dalka oo dhan u qabsado.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Danbigaas cirfiidka ka wayn muxuu yahay? tan oo aan la dhihi karin waa fulaynimo, danbi uusan jirin kalmad qarmuunkiisa intaa gaarsiisan tahay oo dunidu ay iska fogayso, carrabkeenana uu diidayo inuu magac siiyo.

Meelee, hal dhinac konton kun oo hubeysan, dhinaca kalena intoo kale, ha is dagaalaan hal dhinac waxay u dagaalamee inay haysato xurnimadeeda dhinaca kalena gardarro ayay ku socotaa; dhinacee ayaad u maleyn in guushu la jirayso? Nimankee ayaad u malayn inay geesinimo ugu soo ruqaansanayaan dagaalka? - kuwa sugaya abaalmarinta dhibka ay marayaan oo ah xornimadooda ay haystaan? mise kuwa aan rajayn karin wax abaal marin ah dhirbaaxooyinka ku dhacaya marka laga reebo inay kuwa kale addoonsan doonaan? dhinac indhahooda hortooda waxaa yaalla barakadii ay haysteen, rajo iyo farax taas la mid ah. Niyadooda wax badan iskuma mashquulinayso xanuunka yar ee dagaalka marka loo barbardhigo waxa dhiba ee korkooda weligiis saarnaanaya iyaga iyo carruurtooda ka dambaysaba. Dhinaca kale ma haystaan wax dhiirri galiya marka laga reebo dalabka ka taagta daran ee iimaan darrada ah taaso la waayayo khatarta ka hor. mana ahaan karto wax la jeclaysto ama firfircooni keenaysa, waxay aniga iila egtahay kuwa xaqa ku taagan inaysan ka xumaanayn inta ugu yar ee dhiig daata. Tixgeli dagaaladdii caanka ahaa ee Miltiades, Leonidas, Thermistocles oo weli si fresh ah ugu xusan taariikhda qoran iyo maskaxda ragga sidii iyagoo shalay dhacay. Dagaallo ka dhacay giriig oo u dhacay in la ilaaliyo daryeelka giriiga tusaalena u ah adduunka.

Maxaa u malaynaysaa awooda dad fara ku tiris ah inay xoog kaliya laakin geesinimo ay ugu adkaysteen weerar maraakiib oo aad ubadan oo badihii ay culaysiyeen iyo jebinta ciidamo ka kooban quruumo badan oo tiradooda ay khalqi tahay saraakiisha kaliya ayaa ka badnaa xoogaga giriiga oo dhan.

Maxay ahayd oo ka baxsan xaqiiqada ah maalmahaas guusha inuu ahaa mid matalaaya wax aan ahayn dagaal ay is dagaaleen giriig iyo Pershiyans laakiin tahay guul usoo hoyatey xornimo-doon marka loo fiiriyo awood sheegasho ama madaxbannaani marka loo fiiriyo iimaan darri.

Way naga fajicisaa markaan maqalno geesinimada xornimadu ka kiciso laabta kuwa difaaca; laakiin yaa rumaysan kara warbixinnada waxa maalin kasta ka socda dadka ku nool waddamada qaar. Yaa run ahaantii rumaysan kara hal nin kaliya inuu six xun ula dhaqmo boqol kun oo uu ka xayuubiyo xornimadooda? Yaa run u qaadanaaya warbixinta noocaas ah haduu kaliya maqlay, asagoon meesha joogin oo markhaati ka ahayn dhacdada? Iyo haddii xaaladdan ay ka dhacday waddamo fog, oo nalooga soo warbixiyay, kuma oo inaga mid ah ayaan u qaadanayn sheekada wax la mala awaalay ama la soo allifay oo aanba run ahayn?

Way iska caddahay inaan loo baahnayn dagaal lagu meel mariyo halkan daaquut. Oo isagu sideedaba wuu jabi haddii waddanku u diido inay u fasaxaan inuu addoonsado: lagama maarmaan maaha in isaga waxba laga xayuubiyo. Laakiin si sahal ah aysan waxba siin; ma loo baahna in waddanka isu luro inuu wax isu sameeyo, shuruuduna ay tahay inaysan waxba isu gaysan. Sidaas daraadeed waa dadka deegaanka ah oo ogolaaday amaba kaba sii daran keenay sandullaysiga, illeyn hadday joojiyaan inay is dhiibaan way soo afjari karaan addoonsiga. Dadkan is addoominaya iyagaa surka iska gooya iyagoo haysta doorasho ay ku noqdaan maxaysato ama dad xor ah. Waxay ka fakanayaan xurriyadooda oo ay isu rarayaan sida dibida. Madaxa ayay u ruxayaan jabka haysta, amaba ka daran waaba soo dhowaynayaan.

@somalibooks

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Hadday dadka qiimo ugu fadhido inay la soo noqdaan xorriyadooda, maahan innaan ku dhiirri geliyo inay ficil u sameeyaan hadafkan. Iyadoo aysan jirin wax ka qaalisan dib u dhiska xuquuqda ilaahay uu siiyay oo uu ka bedelmo xayawaan raran isuna bedelo bani aadam waa sida hadalku yahaye

Ma waydiinayo baaraandegid, haba jeclaysto amaanka nolosha sillan maka loo eego isku hallayn la'aanta nolosha uu isagu ku qanacsan yahay

kolkaa maxaa xiga? Haddi si uu u helo xornimo aanan wax kale laga rabin oon ahayn ku taamid, hadii kaliya si sahal ah rabitaan ay lagama maarmaan tahay, ma qaran baa jira dunida tixgeliya hal jamasho qiimihiisana uu ku badan yahay si ay dib ugu hantaan xuquuqdooda taasoo waajib ku tahay inay soo ceshadaan iyagoo bixinaaya dhiig; xuquuq luminteeedu ay keenayso raga sharafta leh inay ka gaarto meel ay dareemaan in noloshaba aan loo dulqaadan karin dhimashaduna ay keenayso faraj?

Qofkasta wuu yaqaana in dhimbisha dabka uu badanayo siina holcayo marba meel ka sii sarraysa inta ay helayso xaabo gubanaysa

Haddana iyadoo biyo lagu harraad tirin, laakiin ka warran, kaliya haddii loo heli waayo shidaal uu dabku quuto; wuu is cuni, tartib udhiman ilaa uusan lahayn holac

sidoo kale intaa daaquudka uu wax dhacayo in ka badan bay xaraarad usii kordhinaysaa, intay duminayaan oo halleynayaan waa inta dadku ay iyaga ka danbaynayaan.

Ama adeecayaan, sidaasay awood ku yeeshaan oo ay ku guwadaystaan, oo ay diyaar ugu sii noqdaan inay wax baabi,iyaan ama burburiyaan.
Laakiin haddii wax kasta aan looga danbayn, haddii rabash la,aan la diido in la adeeco, waxay noqonayaan kuwa qaawan oo kala furma oo waxba ahayan, sida marka xididku waayo nafaca, laantu way silloon oo dhiman

@somalibooks

Si ay u helaan khayrka ay rabaan, waxgaradku kama baqo khatarta; qofka caqliga leh ma diido dhibka. Waa nacaska iyo fulayga kuwaas ayaa awoodin inay u adkaystaan dhib ama soo ceshtaan xuquuqdooda; waxay ku joogsanayaan oo kaliya doonis, ayna ku luminayaan jiljileec geesinimada laabtooda ku kicisa inay sheegtaan xuquuqdooda, iyadoo rabitaan uu jiro ah inay ku raaxaystaan xornimo ayna ka mid tahay abuurtooda. Doonis ka dhaxaysa waaya aragga iyo nacaska, geesiga iyo fulayga, rabistan oo ka dhigaysa waxyaabaha kale oo dhan marka la helo, farxad iyo raynrayn.
Hadana hal wax ayaa ka maqan: magaranayo say ku dhacdo in abuurku ka gaabiyo in laabta raga uu geliyo inay u gubtaan rabitaan xorriyad. Barako aad u wayn, aadna loo rabo oo marka la waayo shar oo dhan ay ku xigto, oo xitaa barakooyinka harsan ay dhadhan iyo wanaag beelaan sababtuna tahay addoonimadaa fadaraysay. Xornimo waa farxadda kaliya aysan raggu ku adkaysan; hubaal ahaan hadday dhab ahaan u rabaan way soo gaari lahayd. Muuqaal ahaan waa ay diideen mansabka cajiibka ah maadaama ay sahlan tahay in la helo.

Masaakiin, dad kharriban iyo nacasiin, qowmiyado ayaa tihiin ku adkaysanaya nasiib darro kana indho la' wanaagiina!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaad ogolaateen in laydinka xayuubiyo indhihina horteed inta ugu fiican ee dakhligiina ah
Waxaad u nooshihiin si aydnaan sheegan karin hal wax oo aad leedihiin, waxayna u egtahay inaad isu aragtaan dad nasiib u yeeshay in wixiina la idin amaahiyo.
Dhibkaan oo dhan, nasiib darrada, burburka, idinkama imanayso cadaw shisheeye ee waxay ka socotaa hal cadaw oo idinku aad ka dhigteen mid awoodda leh uu leeyahay, oo aad dartiis dagaal u gasheen, oo sharfidiisa aydaan diidayn inaad u hibaysaan jidhkiina dhimasho. Kan isagu idiin awood sheeganaya wuxuu leeyahay laba indhood, laba gacmood, wax aan ka badnayn inta nin kasta haysto. hal jidh oo kaliya, oo aan ka badnayn waxa ninka ugu yar haysto ee ku jira guryaha xad dhaafka ah ee magaalooyinkiina; waxaa sugan inuusan haysan awood ka badan ta aad idinku gacanta u galiseen si uu idiin burburiyo. Xaguu ka keenay indhaha badan ee uu idinku basaaso? Cagaha ku gaardiya magaalooyinkiina? Xaguu ka keenay hadaydaan idinku lahayn? Sidee ku haystaa wax awood ah hadduusan idinka idiin soo marin? Sidee ugu dhiiraday inuu idin so hujuumo hadaydaan idinku la shaqaynin? Muxuu idinku samayn karaa hadaydaan idinku sharta kula showrin, tuugga idin bililiqaysta, haddaydaan la qamrjiyayn gacan ku dhiiglaha idin dila, hadaydaan idinku is khiyaameynayn? Waxaad abuuranaysiin dalag si uu isagu u khasaareeyo, waxaa alaabo dhiganaysiin guryihiina si uu idin gurto; gabdhahiina ayaa xaamilo u ah, sida hadba damaciisa uu yahay ugu takri fali karo; ciyaalkiinaad korinaysiin si mansab ugu waynee uu yaqaano u gaarsiiyo – in loo hogaamiyo dagaal, in hilibkooda la jarjaro, in la addoonsado isaga iimaan darridiisa darteed iyo inuu ka dhigto aalad aargoosi; idinka jidhkiina ka tanaasulaysiin howl adag darteed si isagu uu ugu talax tego waxa ka farxiya kuna galgasho qudhunka uu ka helo; waad is taagdarraynaysiin si uu isagu itaal u yeesho quwadiisuna u kororto taasoo uu u isticmaalayo si uu hoos idinkugu dhigo. Sharaf darradaas oo dhan oo xitaa bahalladu uma dulqaadan.

@somalibooks

Waad is badbaadin kartaan, Hadaad isku daydaan, idinkoo aan ficil samaynin kaliya raba inaad madax bannaanaataan. Niyada gashada inaydaan mar kale u adeegin. Ma idin waydiisanayo inaad gacan u qaadaan daaquutka oo aad kala tuurtaan, kaliya si sahal ah inaad taageerada ka joojisaan. Kadib waxaad dhursugaysaan inuu sida dhismo wayn dhidibaduu ku taagnaa laga jiitay, uu culayskiisu soo rido oo uu qurub qurub u burburo.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Qaybta II

Xornimo waa xaalada dabiiciga ah ee dadka. Addoonsiguna wuxuu kobcaa marka dadka lagu soo koriyo sandullaysi. Dadka ayaa lagu tababaraa inay aad u jeclaadaan xukumayaasha. Inkastoo xornimada illoobaan dadka intooda badan haddana qaar baa jira aan waligood is dhiibayn.

Shaki kuma jiro in dhakhaartiirtu sax yihiin markay inooga digaan taabashada nabarrada aan dawoobayn; kollay anigu waxaan ku nasiibsanaya sida caadada ii ah inaan wacdiyo, dad lumiyay dareen oo dhan, waxba ka ogayn asaasaqooda, oo si la isaga jeedo la il daran cudurka dhimashada. Sidaas daraadeed bal aynu fahamno inagoo logic ama maangal isticmaalayna, haddaan karno, siday ku dhacday ku fara adayga cinaadkuna ku jiro ee isu dhiibka daaquutka, taasoo noqotay mid xidido qoto dheer leh ku reebta qaran taasoo jacaylka xornimada laftirkeeda aysan caadi ahayn.

@somalibooks

Ta ugu horraysa, waa la isku raacsan yahay haddii aan u noolaano sida ilaahayba sheegay casharada dabeecaddu ina baranayo, waa inaan adeecnaa waalidkayo, tan labaad waa inaan maskaxda ka shaqaysiinaa oo aan addoon qofna u noqon. Inta khusaysa adeecida la siiyo aabaha iyo hooyada, waa isku raacsannahay, qof kasta inuu yahay ka kudayashada mudan.

In caqliga aynu ku dhalanay ama aynaan ku dhalan waa su,aal ay aad uga doodaan aqoonyahannada la xiriira jaamacadaha waana arrin ay falanqeeyaan faylasuufyada oo dhan.

Waqtigan xaadirka waxaan u malaynayaa inaanan khaldanayn markaan iraahdo inay nafta bani-aadamka caqli leedahay ayna ku dhalato, taasoo haddii lagu nafaqeeyo talo fiican iyo tababarna la siiyo, u koraysa sida qof suuban, laakiin dhinaca kale haddaysa ka joogsan dambiyada ku wareegsan ay cabudhmayso oo dayacmayso

Haddana hubaashii hadday jiraan adduunkan wax cad oo iska muuqda oo aan indhaha laga laaban Karin, waa sida adduunka u samaysan yahay, ilaahayna u abuuray uuna ragga u maamulo, isagoo isku ciid naga wada abuuray si aan isugu tiirsanaano oo wehel isugu ahaano.
Haddii markii Ilaahay qaybtiis dadka qaar la fadilo xaga jirka ama nafta, weli dunida nalooma keenin inay tahay meel la isku dagaalo, looguma deeqin kuwa itaalka roon, ama xariifsan inay u dhaqmaan sida burcad hubaysan oo duur jooga oo markaas ay weeraraan kuwa taagta daran.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Gebagebadu waxay ku habboon tahay irsiqa oo wax badan qaar lasiiyo qaarka kalena wax yar, Ilaahay ugu talagalay inuu bixiyo fursad kalgacal walaaltinimo lagu soo bandhigi karo, qaarkayo oo itaal leh inaan caawino kuwa aan lahayn oo u baahan.

hadaba maadaama hooyadan naxariista leh ay na siisay dunida oo dhan inay ahaato meel lagu noolaado, waxay na dejisay isku guri, isku si bay noo samaysay si taageeridda midba midka kale aan isugu soo dhawaano oo iska dhex garanno; maadaama ay noogu deeqday cod, hadal, xiriir walaaltinimo, oo markaas aan hanano si guud iyo si kaalin lehba weedha kulminaysa waxaan damacsannahay. Ay isku dayday si kasta inay soo yarayso oo giijiso xiriirka midnimadeena iyo qaraabanimadeeba; iyadoo na tustay hab kasta oo suurogal ah niyadeeda, maahan inaan isku wada biirno oo aan noqonno hal noole oo dhamaystiran, ma jiri karo shaki inaan kulligayo xor nahay, dabiiciyan, oo aan kulli nahay asxaab. Iyadoo taa la waafajinayo inuusan qofna maskaxda gashan in dabiiciyan qaarkeen ay ku meelaysan yihiin addoonsi maadaama kulli ay naga dhigtay kuwa isu eg.

Sidaas daraadeed waa uun ku daalid kaliya in lagu murmo in xornimadu tahay dabiici, maadaama qofna aan lagu hayn Karin addoonsi iyadoon qalad laga gelin, marka caqliga laga shaqaysiiyo, majirto wax ka soo horjeeda cadaalad darro.

Maadaama xornimo ay tahay sida illahay nagu abuuray, kaliya maaha inaan haysanno ee waa inaan u gubanno difaaceeda. Hadda haday jiraan dad ka shakisan biyodhaca oo sillan taas oo ay kari la'yihiin inay garowsadaan xaqooda iyo waxay ku dhasheen. Waxaan siin doonaa sharafta ay mutaysteen iyo makaankooda, waa sida hadalku yahaye, Gole soo fariisi bahallo miciyo leh, oo ifi qaabkooda iyo xaaladooda. Wuxuush asal ah, Allow ii gargaar! Haddii rag aysan dhagool noqon, ku qayli, " ha noolaato xornimo" Qaarbadan oo kamid ah way dhiman isla marka la qabto: sida kalluunka ay nafta uga tagto marka uu biyaha ka dhexbaxo, noolahani indhaha ayuu xirtaa marka iftiinku qabto mana rabo inuu ka badbaado la,aanta xorriyadiisa ilaah siiyay. Hadii xayawaanku ay lahaan lahaayeen boqortooyo ku salaysan darajo, gobtooda waxaa laga dooran lahaa kuwa noocan ah. inta kale ama ha waynaadaan ama ha yaraadaan, marka la qabto caabin xoogan ayay sameeyaan iyagoo isticamaalaya cijiyaha, geesaha, afka iyo addimada oo ay si cad u tusayaan sida ay aadka ugu dheggan yihiin waxa ay lumaniyaan; marka ay qafis ku jiraan, waxay muujinayaan siyaalo badan oo iska cad inay og yihiin musiibada ku habsatay, oo ay sahlan tahay in la arko inay silcayaan halkii ay ka noolaan lahaayeen iyo inay jiritaankooda ku sii wataan shallaayto xornimadii ka luntay halka ay ku raaxaysan lahaayeen addoonsigooda. Maxaa kale oo sharrixi kara maroodiga kadib marka uu isku difaaco xoogiisa inta ugu danbaysa ee uu garto in la qabtay, inuu gafuurka geedaha ku garaaco ilaa foolku ka jabo oo sidaa ku tusayo doonista uu rabo inuu xor u ahaado sidiisii hore, uuna ku caddaynayo garashadiisa iyo kartidiisa uu kaga gadanayo ugaarsatada oo rajadiisu tahay maadaama uu iska jabiyay foolkii in bixinteeda uu madaxfurasho ka dhigto?

@somalibooks

Waxaan quudinaa faraska marka uu dhasho si loogu tababaro wixii loo diro. Saasoo tahay waa la layliyaa (ama la carbiyaa) oo dhib baa loo maraa taasoo markuu bilaabayo layliga wuxuu qaniina xakanka, wuu ka sii jeestaa garaaca birta cidhibta; sida uu daboolka ka qaadayo instinctga ama aqoonta lagu dhasho camalkeeda ; haddii uu adeeco wuxuu u samaynayaa jujuubka ee maaha inuu raalli ka yahay, maxaa kale oon ku kordhin karnaa?

Xitaa dibiyada raran way cawdaan, shimbirhana qafis kooda ayaa ku dhex shallaayaan.

Noolaha oo dhan, maadaama ay wax dareemaan way ku dhibaatoodaan musiibada sandullaha wayna doonaan xornimo; madaama bahallada oo ilaahay u sakhiray bani-aadamka aysan caadaysan karin in

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

gacanta lagu dhigo iyagoon ka mudaaharaadin maxay tahay sharta bani-aadamka ka rogtay sidii ilaahay u abuuray isagoo ah abuurka kaliya ee u dhashay inuu xor ahaado, inuusan lahayn xusuusta xaaladiisii asalka ahayd uuna damco ah inuu dib ugu laabto?

Waxaa jira saddex nooc oo daaquut; qaarkood waxay ku heleen darajadooda faanka badan doorashooyin, kuwa kale xoog, kuwa kalena dhaxal. Kuwa ku hantay daaquudnimada quwad dagaal waxay u dhaqmaan isla sidaas taasoo ay iska caddahay inay xukumaan waddan ay qabsadeen. Kuwa ka dhashay qaraabo wax xukuntana dhif ayay dhaamaan, oo sababtu tahay waxay nafacsadeen oo naas nuujiyay daaquudka, barteenna qiyaastiisa, waxay u arkaan dadka ka hooseeya inay yihiin addoomo ay dhaxleen, bakhayl ha ahaado ama qof aad u gacan furan, waxay ula dhaqmaan boqortooyada sidii wax ay leeyihiin.

Ka isagu ka helay inay shacabku siiyeen madaxtinimada, siday tahayba waa inuu yahay siday aniga ila tahay mid loo dulqaadan karo wuuna ahaan karaa, waxaan u malaynayaa haddaysan jirin xaqiiqada ah isla marka uu isu arko inuu dadka ka sarreeyo inuu aad ula dhaco waxaan ugu yeerno isla wayni, oo markaa weligiis katagi maayo kursiga.

Ninkaasoo kale badanaa waxaa ka go,an inuu carruurtiisa u gudbiyo awooda ay shacabku u dhiibteen; oo mar haddii dhaxal sugaha ay qaateen fikirkaas, waa wax lala yaabo markay dhaafaan daaquutyada kale danbiyaday ku kacaan Iyo gaar ahaan axmaqnimada.

@somalibooks

Sababtuna tahay ma helayaan si kale oo ay dhabarka shacabka u saarayaan daaquudnimo cusub marka laga reebo inay giijistaan xukunkooda, iyo inay dadkay u taliyaan ka fogeeyaan wax xorriyad ah oo xitaa haddii xusuustooda ay fresh tahay goor dhow waa la suulin. Iyadoo hadalka saxda ah yahay, inaan u arko inuu farqi u dhexeeyo saddexdan nooc ee daaquudnimo, laakiin hadday kala doorasho tahay, ma u quudho midna, inkastoo ay kala duwan tahay sida awooda lagu helo, haddana habka xukumida waa isku mid; kuwa la doorto waxay u dhaqmaan sidii inay laylinayaan rati, kuwa ciidan wax ku qabsaday waxay dadka ka dhigtaan ugaar, kuwa wax dhaxlana waxay ku tala galaan inay dadka ula dhaqmaan dadka sidii inay adoomohooda yihiin.

Tiiyoo lala xiriirnayo,ka soo qaad qof hadda dhashay, aysan is aqoon addoonsi oon damcaynin xornimo, jaahil rasmi ah sida kelmaduhuba sheegayaan. Haddii loo ogolaado inay addoomo noqdaan ama rag xor ah, teebay dooran lahaayeen?

Shaki kuma jiri karto inay jeclaysanayaan in loo hago si caqligal ah halkii laga amri lahaa marba dhinac, hadba siday latahay hal nin. Ta kaliya ee aan ku jirin waxay ahaan kartaa Israaiiliyiinta, kuwaasoo iyadoon la qasbin ama u baahan magacowday daaquut.

Taariikhdooda ma akhrin karo, anigoon ka cadhoon xitaa dadnimo xumadayda inaan ku qanco sharta faraha badan ee halkaa kala kulantay. Laakiin hubaal rag oo dhan, inta ay rag yihiin oysan isu ogolaan in la addoonsado waa in awood loo sheegtaa ama la siraa; Markay qabsadeen ciidamada ajnabiga Sparta iyo Athens, xoogagii Alexander, amaba kooxo siyaasadeed; iyo markii ka horraysay ee Pisistrates gacan ku hantay Athens

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Markay xornmidooda lumiyaan, marin habaabis darteed maaha badana in la khiyaameeyey ee waa way is habaabiyeen.

Tani waxay ku dhacday dadkii Syracuse, oo ahayd magaalada koowaaad ee Sijilia, markii dagaallo halis ah iyadoon laga fiirsan, kuna talagalayaan khatarta jirta, ay dalliciyeen Denis, daaquudkii koowaad, ay ku aamineen hoggaaminta ciidamada, aysan garowsan inay awoodaa siiyeen, taasoo markuu guusha la soo noqday ninkan qiimaha leh u dhaqmay sidii inuu ka reeyey waxaan ahayn cadawgii ee ah dadkay isku wadanka ahaayeen. Isagoo kabtan ah isu bedelay boqor, hadana boqor isu bedelay daaquut.

Lama rumaysan karo sida isla markii dadku galaan maamul gumaysi, waxay gebi ahaan illoobaan xurriyadooda ay adag tahay in lagu kiciyo sidii ay dib ugu soo hanan lahaayeen.

Iyagoo adeecaaya si sahlan, raallina ka ah oo u qofku dhihi karo, haddii la eego xaaladda saas ah, in dadkan aysan xornimo ka lumin ee ay ku guulaysteen cabiidsigooda. Waa run in bilowgii raggu jujuub isu dhiibaan iyo xoog; laakiin kuwa danbe way adeecayaan iyagoon ka xumaan ayna wixii samaynayaan iyagoo ka raalli ah wax alle wixii kuwii hore sameeyeen maadaama kuwaasi ku qasbanaayeen.

Taasaa keenta in ragga ku dhashay iyagoo raran oo nafaca kahelay oo lagu dhalay addoonimo ay yihiin dad faraxsan, iyagoon is lurayn ayna sidaas ku noolaadaan, oo aan ogayn xaalad kale ama xuquuq, una haysta sidii ilaahay ka dhigay oo ay iyaguba ku dhasheen.

Si kastaba ha ahaatee, majiro dhaxle aad u gacan adag, ama aan kala jeclayn mana ka reebayso in uu marba eego buugga xisaabaadka maamulka ee aabihii, si uu u arko inuu weli ku raaxaysanayo mansabyada looga tegay ama haddayba jirto in xaqiisa ama kuwii isaga ka horreeyey aan lagu soo durkin.

Saasooy tahay way iska caddahay in ku filan in saamaynta dhaqanka uusan ka darnayn ta kale oo ah magac ahaan la qabsi gumaysi. Waxaa la yiri Mithridates inuu isu tababaray inuu sun cabo

@somalibooks

barashada kadibna uusan qaraar u dareemin, sunta addoonimada. Lama inkiri karo in Ilaahay ina hago siduu doono uuna naga yeello oo markaas inaga muuqato deeqda rabbi badnaan ama yaraan; Haddana waa in la qirtaa inay awoodaas ay ka yartahay tan dhaqanka & caadada ah, sababtuna tahay waxa ilaahay dhalasho ku bixiyay, si kasta oo ay u fiican tahay way dhamaadaan haddaan la dhiirri gelin, halka bay'adu qaabkeena samayso waxay taasi tahayba. Iniinta fiican ee Alle inagu beeray way yartahay oo simbiririxan tahay mana xamili karto nabarka ugu yar ee kaga yimaada nafcinta gurracan. Way kobcid darraysaa, ooy qudhuntaa, oo taagdarraysaa oo waxba noqon waydaa

Geedaha miraha leh midkasta wuxuu leeyahay tayo gaar u ah, haddii loo ogolaado inay u koraan iyadoon la farafarayn, laakiin way ka luntaa islamarkiiba oo ay miro hallaysan dhalaan oo kuwooda aan ahayn marka la xardho. Caws kasta wuxuu leeyahay calaamado ugaarka ah, suubanaantiisa, iyo astaamihiisa; waxaase jirta in qabow saa,id ah, cimilada, carrada, beeralayda gacantiisa ay ku kordhin ama ka dhimi karaan itaalkeeda, geedka lagu arko meel laguma khaldi karo mid kale.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Qofkasta oo u fiirsaday Venezianiskii hore, dad kooban oo u nool si madaxbannaan, oo kan ugu qamarjisan uusan jeclaysan inuu boqor u noqdo, sidaa ku dhashay oo loo tababaray sifo aysan u tartamin dhexdooda marka laga reebo ka talada ugu fiican bixin kara, nafaqayn kara xornimadooda sida ugu naxariista badan, loo tarbiyeeyey oo loo kobciyay laga soo bilaabo xoolka inaysan ku bedelan waxa adduunka yaalla oo dhan inta ugu yar xornimadooda; kuma baan odhan kara yaqaana dabeecadooda asalka ah ee dadka saas ah, ayaa maanta booqan kara dhulkaas uu joogo ninka la yiraa Great Doge, oo ka feker kana baaraandeg arrintan waxay noqdeen dad noloshooda aan la rabin waxkale marka laga reebo inay u adeegaan, oo awoodiisa ku dayac tiraan lafahooda?

Yaa rumaysanaya labadan koox waa isku asal ? Miyaan qofku sideedaba ku soo koobi karin, magaaladooda markaad ka tagtay inaad soo noqodkii aad ka dul dhacday bahalo isdhex yaacaya? Lycurgus Xildhibaanka Sparta ayaa laga soo warramay inuu koriyay laba eey oo isku mar dhashay, mid wuxuu ku naaxiyay jikada, ka kalena ku tababaray beerta dhawaaqa trumbada (bugle) iyo hoonka, oo uu ku tusayey Lacedaemonians in raggaba ay u koraan si waafaqsan caadaysigooda.

Labadii eey ayuu geeyey meel suuqa, dhexdooda wuxuu dhigay baaquli maraq ah iyo bakayle, Midi baaquligii buu ku cararay, ka kalena bakaylihii, weliba siduu ku adkaystay waxay ahaayeen walaalo wada dhashay, oo isku waalid ah. Sidaas ayuu hogaamiyahan sharciyadiisa iyo dhaqankiisa ay saamayn ugu lahayd Spartanska, taasoo midkasta oo ka mid ah uu jeclaan lahaa inuu dhinto halkii uu ka aqbali lahaa wax ka sarreeya sharci iyo caqligal.

Way I raalligelinaysaa markaan soo xasuusto waqahadal waqti hore dhexmaray gacan yarayaashii Xerxes boqorkii waynaa ee Pershiya iyo labo reer Lacedaemonia ah .

Markii Xerxes uu qalabeeyey ciidankiisa si uu u qabsado Griig, wuxuu u diray ambassadorskiisa magaalooyinka Griiga, inay waydiistaan biyo iyo dhul

Taasoo ahayd habka Pershiyansku ay u dhaqmaan markay ku amrayaan magaalooyinka inay is dhiibaan. Athens iyo Sparta toona looma dirin farriin wadayaashii oo sababtu tahay kuwii hore uu diray Darius Aabihiis, waxaa lagu tuuray oo reer Athens iyo Sparta ay ku tuureen, bogag qaar kalena ceel, iyo martiqaad ah inay Isku caawiyaan si bilaash ah biyaha iyo ciida oo ay markaa u celiyaan amiirkooda.

Oo Griigaasi maysan oggolaan xitaa inta ugu yar ee dhahaysa in lagu soo durko xorriyadooda Spartans waxay tuhmeen sikastaba ha ahaatee inay ku heshay cadhadii ilaahooda waxa ay sameeyeen, waxayna go,aansadeen inay u diraan Xerxes labo muwaadin oo ka raalli galisa dhimashada axmaqnimada ee loogu gaystay safiirada aabihiis. Labada Spartan mid magaciisu yahay Sperte ka kalena Bulis, ayaa iskood is xilqaamay inay naftooda huraan. Wayna safreen jidkay soo qaateen oo yimaadeen qasriga Persian magaciisu ahaa Hydarness, oo ku xigeen u ahaa boqorka una xil saarnaa kulli magaalooyinka dhan ee ku yaalla xeebaha Aasiya

Wuxuu u qaabilay si aad u sharaf badan, alla barina u sameeyey, kadib markii mid iyo laba ka hadlay ayuu waydiiyay maxay u diideen boqorka saaxiibtimadiisa. “Ka fiirso si faacan kuwiinaan reer Sparta” ayuu yiri “ oo eega tusaale ahaan anigaba, boqorku wuu yaqaanaa sida loo sharfo kuwa istaahila, iga rumaysta haddii aad raggiisa tihiin intaasoo kale ayuu idiin sameeynayaa; haddaad isaga la socon lahaydeen uu idin aqoon lahaa, idinkuma jireen qof aan madax ka ahaan lahayn magaalo griig ah.

@somalibooks

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

“kelmedahaas Hydarnes, maadan nasiinin talo fiican,” waxaa ku jawaabay reer Lacedaemonia, “ oo sababtu tahay waxaad noloshaada kusoo martay ee ku anfacay ayaad ka hadashay; ma garanaysid mansabka aan haysanno. Waxaad haysataa sharafta boqorka iyo axsaankiisa; laakiin ma garanaysid xornimo macaankeeda oo haddaad garan lahayd, adiga ayaa nagula talin lahaa inaan ku difaacno, waxaan ahayn waran iyo gaashaan laakiin ah ilkaha iyo cidiyaha.

Spartans kaliya ayaa jawaabtaas bixin kara, hubaal labada waxay u hadleen sidii loo soo tababaray. Suurto gal uma ahayn Persianka inuu ka xumaado xornimo, ma uu yaqaano, sidoo kale reer Lacedaemonia sandullayn inay aqbalaan iyagoo ku raaxaystay xornimo.

Ninka magaciisu yahay Kato, eek a yimaada carriga Utican, isagoo weli ah cunug oo ka hooseeya spaarada, wuxuu gali jiray ama ka bixi jiray guriga macangaga Sylla. Sababtuna tahay meesha iyo reerka uu ka soo jeedo, iyo maadaama isaga iyo Sylla ay ahaayeen qaraabo is xiga, albaabka isaga weligii lagama xirin.

Macallinkiisa ayaa markasta la socday goorta uu tago meeshaas, sida caadada u ahayd carruurta ay dhasho madaxda. Wuxuu ogaaday in guriga keligii taliyahana Sylla, isagana uu jooga ama amarkiisa rag lagu xabisay, qaarna la xukumay, midna la qixiyay, midna la ceejiyay; mid ayaa ku adkaystay alaabta muwaadin kale, mid kale madaxiisa; soo koob kulli waxay meesha u tageen maahayn guri si cadaalad ah loogu kala baxo ee waa meel daaquut. Sidaas daraadeed maxkamad cadaalad maaha ee waa goobta uu daaquutku ku nasto.

@somalibooks

Kokaasuu ku yiri wiilkii yaraa macallinkiisa, “Maad I siisid toorrey? Waan qarin marada hoosteeda. Waxaan badiyaa tagaa Sylla qolkiisa intuusan hurdada ka kicin, gacantaydana xoog ku filan bay leedahay, si isaga magaalada looga waayo” kaasi waa hadal runtii astaan u ah Kato; waxayna u tahay bilow run u ah geesigan oo u qalanta halkii uu gaaray. Iyadoon la sheegin magaciisa ama waddankiisa, keliya la yiraaho xaqiiqda siday thay, dhacdada kaligeed ayaa xarrago uga hadlaysa, qof kastana wuu garan inuu ahaa Roman ku dhashay Rome xilligii ay xorta ahayd.

Waxaanoo dhan maxaa? Hubaal ahaan sababtu maaha inaan aaminsanahay waddan ama gobol ayaa shuqul kuleh, oo meel kasta iyo cimilo kasta sandullaysugu wuu qaraar yahay, inaad xortahayna way macaan tahay; laakiin kaliya sababtu waxay tahay inuu qofku ka naxo kuwa ku dhashay iyagoo sida dibida u raran.
Waa inaan u dambi dhaafno oo aan cafino, maadaama aysan arag harka xorriyada, iyo iyagoon ogayn aysanna arki karin sharta uu leeyahay iyo rafaadka addoonsiga. Haddii uu jiri lahaa waddan sida ka Cimmerians uu sheegay Homer halkaasoo ay qorraxdu ka ifto sida ka duwan taayada, iyadoo u saydhaysa fallaaraheeda siaan kala go’ lahayn lix bilood oo isku xigta kadibna ka tagaysa, bani aadamka inay ku lullmoodaan mugdiga miyay lama filaan tahay inaan barano, kuwa ku dhashay habenka dheer inay ku koraan oo caadaystaan mugdiga ay ku dhasheen taasoo haddii aan loo sheegin qorraxda, aysanba rabin inay arkaan iftiinkeeda?

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Qofna niyada kama jeclaysto wax uusan weligii aqoon; ku taamistu waxay timaadaa kaliya macaansiga kadib, waxayna qayb ka tahay murugada kadib xusuus farxadihii lasoo dhaafay. Run ahaantii waa sida Ilaahay u abuuray bani aadamka inay madax bannaanaadaan, ayna jecel yihiin inay sidaa sii ahaato, weliba shakhsiyadiisa waa sida inuu instinct ahaan raaco halka uu u janjeero tababarka lagu siiyo.

Sidaas daraadeed aan qirano waxyaabaha dhan ee lagu tababaro ama uu caadaystay, ula eg yihiin dabiici. Taasoo ka dhigaysa ta kaliya ee uu yaqaan lana socota aqoon ku soo gaartay tababar la,aan. Dhaqanka ayaa ah sababta koowaad ee qofku isu addoomiyo. Bani-aadamku waa sida fardaha tartama ee quruxda badan oo marka hore jeeraha qaniina kadibna ka hela, iyagoo markay qaadaan jaraha islamarkiiba ku tusinaya xarkahooda, boodboodna ku faanaya dabinka hoostiis.

Sidoo kale raggu waxay ku koraan oo caadaystaan fikradda inay iyagu weligood sandullasyi ku jireen, oo aabayaashood sidaa u noolaayeen; waxay moodayaan inay ku qasban yihiin dhibaatada kasoo gaarta shartan, iskana dhaadhicinayaan iyagoo tusaale iyo ku dayasho ka dhiganaya kuwo kale, ugu danbayan waxay maalgashanayaan kuwa am-amra, sidii inay xaq u leeyihiin ku salaysan fikrada ah inay weligeedba sidaa ahayd.

@somalibooks

Waxaa markasta jira tiro yar oo ilaahay waxka badan siiyay kuwa kale, kuwaasoo dareemaya culayska rarka oo aan iska celin karin inay isku dayaan inay iska tuuraan: kuwani waa rag aan weligood rabaayad noqonayn iyagoo sandulle ku hoos jira, iyagoo markasta sida Yulisis, berri iyo badba si aan doorsoomayn u raadinaya nafis, oo naftooda ka joojin karin inay u khaawisto mansabka Ilaah siiyay iyo inay xusuustaan aabayaashood iyo siyaabihii hore ee loo dhaqmi jiray.

Kuwani dhab ahaantii waa ragga maskaxdoodu barax ku jirin, nafsadooda meel fog wax ka aragto, oo aan ku qanacsanayn sida duul aan naxayn, kaliya inay arkaan waxa cagahooda ag yaalla, laakiin ay eegaan dhinacyadooda, gadaal iyo hore, ayna soo xasuustaan waxay soo dhaafeen si ay u go,aamiyaan mustaqbalka ayna isu barbardhigaas labadaas, xaaladdii hore iyo tay hadda ku sugan yihiin. Kuwan ayaa ah; kuwo maskaxdooda fiican ku sii tababaray wax barasho iyo ardaynimo. Xitaa haddii xornimo ay gebi ahaanteedna ka le'atay dunida, raggani way soo allifayaan. Iyaga addoonimo umalaha qancis, si kasta oo loogu hagoogo.

Madaxa turkiga wuu gartay in buugaagta iyo barida si kabadan kuwa kale ay siiyaan ragga dareen ay ku fahmaan bey'adooda ayna ku nacaan daaquudnimada

Waxaan fahamsanahay in dhulkiisa dad yar ay wax barteen, oo ma rabo kuwa badan. Mamnuucidaan darteed rag xamaasad adag haya, kuwaasoo iyadoo weliba waqtiqu dheeraaday kaydiyay jacaylka xornimada, welina raadreeb lahayn sababtuna tahay si kastoo ay u badan yihiin, isma yaqaanaan; daaquudka hoostiis ayay kaga luntay xornimadoodii wax wada qabsiga, ta hadalka, iyo ta fikirka, waxay kali ku yihiin doonista xornimo. Hubaal qofna ma daalacan karo waxa quluubta bani-aadamka ku jira.

Waxaa lasoo weriyay in Brutus Kassius iyo Kasca markay isku dayeen inay xoreeyaan Rome, iyo isla mar ahaantaaba dunida oo dhan, inay diideen inay ku daraan Sisero, kaasoo aad ugu xamaasadaysan daryeelka guud hadduu mid saasa jiro, sababtoo ah waxay ku qiyaaseen laabtiisa mid aad u jilicsan marka

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

loo eego ficilkan maamuuska leh; way aamineen rabitaankiisa laakiin maysan hubin geesinimadiisa. Weli qofkasta oo barta wixii la sameeyey maalmihii hore ee ku xusan kutubka qaddiimka ah wuxuu ka helayaa sida dhacda marna inaysan geesigu gabin inay ka badbaadiyaan waddankooda gacmaha sharta wata, marka ay howsha u agaasimaan si sugan, waxba lagala hagran, iyo niyad daacad ah. Xornimo iyadoo is daah furaysa waxa ay tahay, waxay siisay itaal cusub.

Harmodios iyo Arisogiton, Thrasybulus, Brutuska Wayn, Valerianus, iyo Dion waxay ku guulaysteen waxay ilaahay dartii u qorshaysteen: way adag tahay in nasiib fiican uu ka gaabiyo doonis adag. Brutus ka yar iyo Kassis ba way ku guulaysteen inay addoomaysiga baa,biyaan, inkastoo ay ku dhinteen markay isku dayeen inay dib usoo celiyaan xornimo, may aysan ku dhicin musiibo (oo waxayba tahay diin cay in la yiraa wax musiibo ayaa haleeshay raggan dhimashadooda ama noloshooda!) Wayntooda waxay noqotay khasaare wayn, nasiib darro aan dhammaanayn, iyo burburka gebi ahaanba ku dhacay Jamhuuriyadii, taasoo iyaga lala xabaalay.

Marar kale oo danbe tallaabooyin ay qaadeen Roman Emperors, waxay uun ahaayeen shirqoollo dad hammi ku jiro, kuwaasoo aan istaahilin wax naxariis ah nasiib darradii ay u hanqal taageen, oo way iska caddahay inaysan isku dayin inay burburiyaan laakiin kaliya ay afgambiyaan boqortooyada, iyagoo maleegaaya inay cayriyaan daaquudka laakiin daaquudnimada sideeda u daayaan. Aniga ahaan, ma jeclaysan karo raggaasi inay barwaaqo gaaraan waan ku faraxsanahay inay tusaalahooda ku tuseen magaca qaddarinta mudan ee Xornimo inaan weligeed loo isticmaalin in la huwiyo ficil aan u qalmin

@somalibooks

Laakiin markaan kusoo noqdo sheekadii hore ee oraahdayda, taasoo aan sida dhacdada ah lumiyay: sababta lagama maarmaanka ah ee raggu amar u qaataan iyagoo raalli ah, waxay tahay waxay ku dhasheen addoonimo, uurkana ku galaan sidaas. Sababtanna waxaa daba socda natiijo kale, magac ahaan dadku waxay noqdaan fulayiin iyo isu dhiiba daaquudka hoostiis, oo dhugashadan waxaan aad uga mahadinayaa Hippocrates, aabaha caanka ah ee dawooyinka, kaasoon xusay kagana warbixiyay buugga cinwaankisu yahay “Concerning Diseases”, ninkan caanka ah waxaa hubaal ah in Ilaahay ugu deeqay laab wayn wuxuuna ku caddeeyey jawaabtii uu siiyay Boqorka Wayn, kaasoo rabay inay isagu isku dhajiyo shaqsi ahaan isagoo isticamaalaya mansab iyo haddiyado waawayn. Hippocrates wuxuu ku jawaabay si saraaxad leh inay ku noqonayso culays wayn in aqoontiisa loo isticmaalo in lagu daweeyo Barbarians kuwaasoo jecel inay dilaan dadkiisa griiga ah, ama inuu si daacad ugu shaqeeyo isagoo isticmaalaya xirfadiisa, qofkasta oo isku daya inuuu addoonsado giriig. Warqaddii uu u diray boqorka waxaa laga akhriyi karaa oo ay ka midtahay qoraalladii dhaxalka ee uu ka tegay oo weligeed markhaati ka tahay laabtiisa wayn iyo dabeecadiisa gobta ah.

Hadda waa inay iska cadaataa in xornmo markay lunto, geesinimaduna way dhimataa. Dad la sandullaysto malaha farxad ama rabitaan dagaal: raggoodu waxay u gaardiayaan iyagoo madaxa raaricinaya khatar, sidii iyagoo silsiladaysan oo niyad jab ah; ma dareemaan garaaca wadnaha ee ay keento rabista xornimadu taasoo soo saarta inaan dhib loo arag dhimashada kuna reebta diyaar garow lagu helo sharafta iyo guusha ay leedahay dhimashada geesinimo adigoo kudhex jira raggaaga.
Waxaa ka jira ragga xorta dhexdooda tartan ka inta ugu badan samaynaya kulligoodna ay u qabanayaan wanaaga guud, mid kasta keligiis, iyagoo rajaynaya inay qaybsadaan nasiib darrada guuldarraysiga, ama faa,iidooyinka guusha; laakiin dad la addoonsaday waxaa ka lumaya geesinimada marka laga tago

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

calaamadaha xamaasada oo dhan oo laabtooda ayaa hoos u dhacday, oo hoggaansan mana laha karti iyo awood ay wax wayn ku samaystaan. Daaquudyadu way lasocdaan taas, si ay maxaysato uga dhigtaan , waxay ku dhiiri geliyaan inay qaataan fikirkaas oo ay ka dhigayaan mid instinct ah.

Xenophon, taariikhiyahan halka ugu sarrayso ku jira Griig, wuxuu qoray buug uu Simonides kula hadlay Hieron, Daaquudka Syracuse, ku saabsan cabsiyaha lasoo derista daaquudka. Buuga waxaa ka buuxa tusmooyin siday ila tahay kaa dhaadhicinaya inta kelmado karaan.
Ilaahay baan ka baryayaa macangag kasta oo weligii mar noolaaday uga dhigo muraayad hortooda taalla! Ma rumaysan karo inay ka gaabinayaan inay gartaan burooyinkooda ayna ka dhex arkaan qawadkkooda ceebtiisa, buuggan wuxuu sharaxayaa jahawareerka naxdinta leh ay daaquudyada ku jiraan markay ku qasban yihiin inay ka baqaan qof kasta oo sababtu tahay qof kasta way ku gardarroodaan. Waxaa kaloo ka helaynaa odhaahda boqorrada xun waxay shaqaalaysiiyaan ajnabi u dagaalama oona ay lacag ku siiyaan, kuma dhiiranayaan inay ku aaminaan hub gacmaha dadkooda kuwaasoy ku xadgudbeen.(Waxaa jira boqorro fiican oo isticmaalay calooshood u shaqaystayaal ajnabi ah uu ku jiro faransiis, inkastoo ay taasi dhici jirtay waqti lasoo dhaafay marka loo eego hadda laakiin ujeedo taa ka duwan, iyadoo difaacayay dadkooda, oo u arkayn waxba lacagta ku lunta howsha lagu badbaadinayo nolol faransiis. Taasoo aan rumaysanahay waxa u Scipio Afrikaankii waynaa uu ka waday markuu lahaa waxaan badbaadinayaa nolosha hal waddani haddaan ku beddelan karo boqol cadaw oo an jabiyo)

Way iska caddahay in kaligii taliyaha uusan ku xisaabtamin in awoodiisa ay tahay mid sugan illaa uu gaaro halka uusan harin hal nin oo qadarin hel. Sidaas daraadeed waxaa si cadaaladi ku jiro lagu dabaqi karaa sida ninka maroodiga u sarreeya oo uu sameeyey Thrason sida uu ka warbixiyay Terence:

> Ma waxaad la faan badan tahay
> Inaad u talisid wuxuush duunjoog ah?

@somalibooks

Habka ay daaquudyadu isticmaalaan inay ku bajiyaan maxaystada ay u taliyaan tusaale ka fiican majiro marka loo eego waxa uu Syrus ku sameeyey Lydians(ka), markii uu qabsaday Sardis magaala madaxdoodii, Kroessus boqorkoodii taajirta wayn ahaa oo nolol lagu qabtayna uu naf bidayay naxariista Syrus, markii loo sheegay in shacbigaas ay gadoodeen waa ay sahlanaan lahayd inuu xoog ku muquuniyo; laakiin muusan rabin inuu bililiqaysto magaalo aad u wanaagsan muusan rabin inuu meesha ku hayo ciidan nabadgelyada ilaaliya, wuxuu uga fekeray si aan caadi ahayn oo dhakhso ah inuu ku dabbaro

Wuxuu sameeyey guryo makhbarado, baarar, iyo ciyaaraha dadwaynuhu daawadaan, wuxuuna ogaysiiyay in dadka deegaanka ay ku raaxaysan karaan. Wuxuu ogaaday inayba tahay sida askarta waardiyaha qabta, waxayba noqotay mid si fiican wax u tartay oo markaa seeftiisa galka kama saarin si uu ula dagaalamo Lydianska.

Dadkan qarriban way raaxaysteen iyagoo allifay noocyo badan of ciyaaro ah, taasoo Laatinku ay kasoo minguuriyeen kelmed. Waxa aan niraahno waqti lumis waxay yiraahdaan ludi iyagoo ka wada Lydi.

Maahan in daaquudyada kulligood ay soo bandhigeen si cad damacooda inay naagaystaan dadkay dulmaan, Laakiin xaqiiqdu waa macangagga aan kor ku xusnay waxa uu dadwaynaha ogaysiiyay, isla markaana uu hirgaliyay, kuwa kalena way dabagaleen si sir ah. Run ahaantii waa waxa dadwaynaha u ah dabiici kuwaasoo ciriiri ugu nool magaalooyinka, way ka shakiyaan ka daryeelkooda laabta ku kaya halka ay god ugu dhacaan kuwa khiyaameeya.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Ha moodin inay shimbir jirto ka sahlan in lagu qabto dabin, ama kalluun jiro ku dhega jillaabka leh dirxiga, marka la barbardhigo dabaalliinta sida fiican loogu siray in la addoonsado, iyadoo kaliya baal shimbir la hormariyay waa sida hadalku yahaye afkooda hortiis. Runtii waa arrin fajiciso ah inay isu ogolaadaan in dhakhsahaas lagu qabto iyadoo xadxad tada ugu yar lagu sameeyey waxay u hawoodaan.

Ruwaayado, shactaro, mahrajaano, gladiators, xayawaan aan la arag, billado, sawirro, iyo waxyaalo kale oo maanka dooriya, kuwaas ayay ahaayeen waxaa dadkii qaddiimiga ahaa looga dhigay maqaalin si loo addoonsado, qiimahii xornimadoodana ku waayeen, qalabkaas ayaana loo adeegsaday daaquudnimada. Carbiskan iyo soo jiidashadan noocan ah ayay kaligii taliyayaashii qaddiimiga ahaa ku guulaysteen inay ku maaweeliyaan maxaysatada oo ay rartaan, dadkii indhahooda walalacda ku wareeray waxay la dhaceen waqti lumiska iyo baashaalka bilaa micnada ah hortoodana llagu flashay, ayna barteen addoonsi si nacasnimo ku jirto, taasoo aan saa loo rumaysan karin, sida carruurtu u barato akhrinta iyagoo eegaya sawirada ifaya ee buugaagta, Daaquudyada Romanka ahna soona allifeen kuna dareen farayaraysi. Waxay badiyaa ku masruufeen maxaabiista iido iyagoo siraaya danyarta kuwaasoo markasta ku jirraban baashaalka cuntada wax kaleba iska daa.

Ka ugu caqliga iyo fahamka badan faraha kama qaadeen baaquliga maraqa ah inuu soo ceshto jamhuuriyaddii Plato. Daaquudyadu waxay qaybiyaan nimco, bariis, caano, iyo shilimaad: markaasuu qof kasta si ceeblaawenimo ah ku qayliyaa. "Boqorku ha noolaado!" Nacasiintu may garowsana in kaliya wax yar looga soo celiyay waxoodii, iyo in xukumuhu aanu siin karin waxa ay helayaan hadduusan markiisii hore iyaga ka qaadin.

Ninka waxaa laga yaabaa in maanta la siiyo kiish lacag ah, uu markaa calooshiisa buuxsado, isagoo amaanaya Tiberius ama Nero deeqsinimadooda, laakiin maalinta xigta ay ku qasbaan inuu hantidiisa uga tago iimaan darradooda awgeed, carruurtiisana damacooda, dhiigiisana arxan darrada emperorskan waawayn, isagoo keeni karin wax iska caabin oo dhaafsiisan dhagax ama budh(garruun).

Colku markasta sidan buu u dhaqmaa, - iyagoo isaga furan laaluush aan si sharaf leh loo aqbali karin, dareen laaweyaalna ka ah meel ka dhac aan loo dulqaadan karin. Maalmahan lama kulmo qof kaasoo maqlay Neero oo aan ka anfariirin magaca bahalkaan qarsoon, ahna wax liita oo qurun badan. Weliba markii uu dhintay ninkaa dadka ka cadhaysiiya, dilaagana ah, bahalkaa duurjoogga ah, sida foosha xun lehna u noolaa. Dadkii roman ee gobta ahaa waxaa xusuusteen ciyaarihii, iyo ciidihii, wayna ka xumaadeen ilaa ay gaareen meel ay tacsi gasho. Sidaasna uu qoray Cornelius Tacitus oo ah qoraa karti leh oo aan kaftamin, hadalkiisuna yahay mid la isku hallayn karo . Tan lama xisaabinayo khaas, marka la dhinac dhigo waxa isla dadkan ay u sameeyeen Julius Siisar, oo dhinac isaca leexiyay sharciyadoodii iyo xornimadoodii, qof ahaanna aniga say ila tahay ma mudnayn wax qadarin ah, marka laga reebo in la sheegay inuu ahaa nin debecsan, taasoo aad loogu ammaano, wax ahayd mid ka karaahiyo badan daaquudka ugu axmaqsan ee abid jiray oo sababtu tahay saaxiibtinimadiisa sumaysan ayaa addoonsigii dhadhanka uga bedeshay dadkii Romanka ahaa. Dhimashadiisa kadib in dadkii oo carrabkooda ka sii dhadhaminaya udgoonka sabtii ama alle bareyadii uu bixiyay maskaxdana ku jirto xusuusta wixii uu farrakhay, ku tartamay inay ammaan ku xusaan. Waxay soo buuxdhaafiyeen kuraasta Forumka inay daawadaan dabkii jidhkiisa ka dhigay danbaska, kadibna ay u taagay koolom (tiir shub ah) "Aabbahii Ummadda" (Sidaasay ahayd inscripshankii ama daabacii ku dul dheganaa caasimada) Waxay aad usii sharfeen markuu dhintay mana jirin wax xaq ah oo qof dunida jooga uu taa ku mutaysan karo.

@somalibooks

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Mana aysan dayicin Emperorkii Romaanka inay qaataan guud ahaan jagada Tribune of the People, qayb kamid ah sababtu tahay xafiiskan wuxuu lahaa qaddarin iyo ku xadgubub la'aan iyo weliba waxaa loo sameeyey difaacida iyo gaashaandhiga dadwaynaha wuxuuna keenayay la doorbido dowladda. Iyagoo isticmaalaya aaladdan ayay hubaal ka dhigeen in dadwaynuhu aamino kulli, sidii iyagoo iska dhigaya inay uun isticmaalayaan jagada oo aysan ku takri falayn.

Maanta waxaa jira kuwo dhaqankooda uusan saa uga duwanayn; weligood ma ku dhaqaaqaan siyaasad cadaalada ka fog, xitaa hadday muhiim tahay, iyagoon hordhac ka dhigta hadal macaan oo ku saabsan daryeelka dadwaynaha, iyo danta guud

Olonga waad garanaysaa qaacidadan ay u isticmaalaan si xarfadaysan meelaha qaar; iyadoo inta badan sida hubaasha aysan xarfad jiri karin meesha isla wayni timaado. Boqorradii Assirians iyo kuwii ka danbeeyey ee Medes dadka inyar bay is tusi jireen oo ay markaa dadka ku dhiirrigaliyaan inay mala awaalkooda isticamaalaan bal waxa ay tahay oo aysan isha ku arkayn

Sidaan ayaa qaramo waawayn oo waqti dheer ku jiray gacanta Assirianska ay caadeeysteen halxidhidaalahan lasocda sandullayntooda, ay isu dhiibeen iyagoo diyaarsan iyagoon garanayn sarreeyaha nooca ay haysteen, aqoonta ay u leeyihiinna ay aad u yar tahay oo kulligoodna ka baqaya qof aysan arag.

@somalibooks

Boqorradii ugu horreeyey ee masar si aan badnayn ayay dadka isu tusi jireen iyagoo sita bisad, ama laan, ama holac madaxa saartay oo sidaas isu qarinaaya una dhaashaadaya sida indha sarcaadlaha oo kale ah

Markay saa sameeyeen waxay ku abuureen maxaysatada qaddarin iyo karaamayn, halka dadka aan doqomiinta ahayn ama aan adoomaysi ku jirin ay ku kicin lahayd layaab iyo qosol

Waa wax laga naxo in dib loo eego liiska aaladaha macangagyadii hore isticmaaleen inay ku sugaan daaquudnimadooda; oo la daah furo xeeladaha doqoni magaratada ee ay shaqo geliyeen, markasta waxay heleen in dadwaynaha ay yihiin kuwa u sahlan khiyaamada, islamarkiibana la qabanayo marka shabaga la fidiyo. Runtii waxay ka caqli badiyeen dhibanayaashooda iyagoona ku jeesjeesaya ayay wax badan sii addoonsadeen.

Faallo see ah ayaan ka samayn karaa ku saabsan sidii lacag faalso kale oo ay dadkii qaddiimka ahaa sameeyeen, oo loo aqbalay sidii lacag run ah? Waxay rumaysnaayeen si dhidban Suulka wayn ee Cagta Pirrus, boqorkii Epirus, inuu sameeyo mucjisooyin oo cudurrada beeryarada ka shaafeeyo; sheeko xariirtii wayna kasii dareen kadib markii isaga maydkiisa la gubay suulkii laga dhex helay danbaskii. Sidan ayay doqoamadu u alliftaan beenta kadibna rumaystaan.

Rag badan waxay soo wariyeen waxyaabahaas, laakiin ay sahlan tahay in la arko in hadalkoodu yahay xan bilaa micne ah oo la soo dhoodhoobay iyo kutiri kuteen suuqa la isla dhexmaro oo asal iyo raad lahayn. Markii Vespesian uu ka soo noqday Assyria, uu soo dhaafayay Alexandria isagoo ku socda Rome si uu u hanto Empaayarka ama dawladda, wuxuu sameeyey mucjisooyin, curyaanka staajiyay, indhoolka

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

aragti u soo celiyay, iyo inkale oo aad u fiican, kuwaasoo kuwa iska rumaysta oo aan kala soocayn ay ila tahay inay ka indhoolaysanaayeen kuwii la daaweeyey.
Daaquudyada naftirkooda ayaa is waydiiya sida raggu ugu dulqaataan silicinta ka imanaysa hal qof Waxay ku adkaysteen inay isticmaalaan diin si ay isugu difaacaan, iyo meeshay suurtogal tahay inay ka amaahdaan qurub ilaahnimo si shartooda ugu kororto . Haddii aan rumaysanayno Sybilka Virgil, oo la yiraa Salmoneus, oo rafaadsan inuu u damaashaaday sida Jupiter si uu u khiyaamo dadwaynaha, haddana ka tooba keenay isagoo zamhariira ku jira: gabaygan baase loo tiriyay:

Wuu rafaaday xad dhaaf oo wuxuu ku dhiiraday inuu ku daydo
danab-Onkodka samada iyo ololka Jupiter
Iyo Karreto ay jiidayaan afar weeraryahan markuu sii baxay, si aan degganayn
Isagoo heehaabaya, farahana ku haysta toosh wanaagsan oo ifaya
Griigga gudahood iyo suuqa
Bartamaha magaalada Elis, uu u fardafuulay si habsami ah:
Oo uu sidaas u bandhigayo guul-beenaadka uu iska maleeyey
Sharaf hubaal tahay ay leeyihiin ilaahyada oo qura
Nacaskan wuxuu ku dayday duufaan, iyo lama dhaajiyaanka onkodka
Kolkuu Brassku isku dhacay iyo wareerka weerarka
isagoo saaran qoobka geesaha leh, oo Allaha awooda badanna uu arkayo
Uu soo ganay toosh, mana aha iftiin daciif ah
oo ka yimid shamac qiiqaya ee ay tahay qaraxa cadhaysan ee onkodka iyo hillaaca
Hoos buu ugu soo dejiyay, isagoo qalabaa geddisan.

@somalibooks

Haddii mid kaasoo kale oo waqtigiisii u dhaqmay keliya dabaalnimada madax adaygiisa darteed, wuxuu ku fiican yahay cadaabta, waxaan u malaynayaa kuwa diinta ku qaraabta ay ku qariyaan qudhunkooda, kuwaasaana sii istaahila in cadaabta lagu guro.

Hoggaamiyayaasheena Fransiiska jooga ayaa hawl galiya aalado noocaas lamid ah, sida sawirka raha, iyo liliga, safiinado barakaysan, iyo halbeegyo leh olol dahabi ah. si kastaba ha ahaatee, maadaama inaga iyo aabayaasheen aanan helin fursad aan kaga shakino.

Boqorradeena waxay markasta ahaayeen kuwa deeqsiyiin ah markay nabad tahay, geesiyiinna ah markay colaada jirto, taasoo u muuqata dhalashadooda inaysan u ekeyn midda ilaahay dadka kale siiyo, xitaa dhalashada ka hor Ilaahay ayaa u qoray dowlad iyo siihaynta boqortooyada. Xitaa haddaysan saa ahayn miyaanay ahayn inaan galo aaggajanjeedha oo is waydiiyo runta dhaqanka faransiiska, ama aan imtixaamo si adag si aan uga saaro wixii dhalanteed ah . Tanaa ah mid daraasad u noqonaysa maansooyinka fransiiska, oo ah kuwo la sharfo oo dib u dhashay sida abwaadana Rosnard, Baif, Dellay. Abwaanadan ayaa difaaca luqadeena si fiican aan ku dhiirran karo inaan rumaysto goor dhow inaysan Griiga ama Romanka aysan waxba kahorreyn ah marka laga reebo da' wayni. Iyo inaan suugaanteena meel uga dhaco – Waxaan jeclahay inaan isticmaalo kelmedaas iyadoo ay jirto in dhawr ay wada jiibiyeen, oo waxaan weli sooci karaa maanta tiro rag ah oo kara inay kor u qaadaan suugaanta iyagoo dib u habaynaya dhaldhalaadkeeda – Laakiin sidaan iri sheekooyinkii Muyuuska dhaawac wayn baan u gaysanayaa haddan ka xayuubiyo kuwa hallaasiga ee ku saabsan Boqor Clovis, kana tirsan siday igula muuqato oo aan arki karo oo an ayidsahay faraxadda hal curinta Rosnardka riwaayadiisa Franciade ay noqon doonto.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Qadarin by mudan tahay sarrayntiisa, waana la socdaa niyadiisa hagaagsan, iyo soo jiidashada ninkaasi leeyahay: wuxuuna ahaan doonaa horseedka inuu u isticmaalo sidii ay Romans u isticmaaleen gaashaankooda barakaysan ee sida Virgil (gabayaa Roman ah) ilaahay cirka uga soo dajiyay. Wuxuu isticmaali doonaa wiqiyada saliiddena barakaysan sida Athenians u isticmaaleen danbiisha Ericthonius; wuxuu ku guulaysanayaa inaan u sacab tunno wixii geesinimo ee aan samaynay siday iyaguba ugu sameeyeen xidhmada zaytuunka oo ay weli ku adkaysanayaan in laga heli karo minnaarada Minerva. Hubaal waan iska leeyahay haddii aan isku dayo inaan caayo taariikhdeena waxa ku xusan oo sidaa aan ku xadgudbo dunida abwaanadeena.

Haddaan ku soo noqdo mawduuceena, sheekadaas oo iga luntay anoon ogayn: weligeed way jirtay in daaquudyadu si ay awoodda u xoojistaan ay aad isugu dayeen inay u tababaraan dadkooda maaha kaliya adeecid iyo addoonsi iyaga faa,iido u ah ee waa in loogu daro in la maamuuso. Sidaa daraadeed kulli waxaan ka iri ilaa hadda ee ku saabsan siyaabaha lagu helay isdhiibid laga raalli yahay, inay lagu dabaqi karo kaligii taliyayaha iyo xiriirka kuwa ka hooseeya ilaa dadka iska caadiga ah.

@somalibooks

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Qaybta III

Hadday wax is badalayaan, qofku waa inuu garowsadaa inta ay gaarsiisan tahay asaaska daaquudnimada ku salaysan xiriirada aadka u faraha badan ee dadka musuqmaasuqan dantooduna tahay sii haynta daaquudnimida.

Hadda waxaan soo gaaray halkii siday ila tahay, isha iyo sirta awood sheegashada, taageerada iyo asaaska daaquudnimada. Qofkii u maleeya in hubka, ama askariga waardiyaha, ama askariga sheeda wax ka eega, ay u adeegaan oo difaacaan amaa gaashaamaan daaquudka, waa sida ay ila tahaye inuu khaldan yahay si daran, kuwaasi waxaa loo isticmaalaa badiyaa sida carwada iyo in awood dadka la tuso, ee maaha in iyaga la isku halleeynayo. Fallaar tuurayaasha way ka mamnuucaan gelida albaabka qasriga ka dharka xun ee aan haysan hub, ee uma diidi karaan ka hubaysan ee hawlgal fulin kara. Hubaal way sahlan tahay in Roman emperorska in yar ay ka badbaaday khatar iyadoo ay caawiyeen waardiyayaasha, kuwaana fallaaro tuurayaashoodii ayaa dilay. Maaha ciidamada fardafuulka maaha kuwa lugta hubka difaaca daaquudka. Tan lama rumaysan karo markaad u fiirsato laakiin waa run.

@somalibooks

Waa run in afar ama shan kaliya ay kaligii taliyaha meesha ku hayaan, afar ama shan ku haya waddanka silsilado addoonsi . Shan ama lix ayaa markasta dhegtiisa gaari kara, kuwaasoo ama iyagu cagahooda ugu tegay ama uu u yeeray inay dambiga axmaqnimada wada sameeyaan, asxaabo lajecel hawadiisa, u laalaadinaaaya wuxuu rabo, lana qaybsada bililiqada. Lixdaan qof waxay u maamulaan suldaankooda si hagaagsan oo uu markaa isagu ka jawaabayo khaladkiisa iyo kooda. Lixdaan waxay haystaan lix boqol oo ka hoos faa,iidda, lixdan boqol ayaa sameeya waxay ka gun gaareen iyaga iyo daaquudka.

Lixda boqol ayaa ah saraakiil ayka hooseeyaan lix kun, oo ay darajooyin u dallaciyaan, kuwaasoo ay u dhiibaan maamullada gobollada ama jihada maaliyadda, si ay u ahaadaan aalad dhuuninimo iyo axmaqnimo, waxay fuliyaan amarrada waqtigooda, kharbudaad badan bay ka shaqeeyaan caam ahaan, oo aysan sii jiri karin marka laga reebo hadhka lixda boqol, lagama cafiyo sharciga ama ciqaabta marka laga reebo saamaynta ay leeyihiin.

Waxa ku dabajooga intan oo dhan waa go’id dhimasho ah, qofkii raalli ku ah inuu furfuro duuduubkan wuxuu arkayaa inaysan lix kun ahayn ee boqol kun ama malaayiin ay ka lushaan daaquudka xarigiisa. Homer siday latahay, Jupiter wuxuu ku faanaa inuu isusoo uruurin karo ilaahyada oo dhan marka uu soo jiido silsiladda

Nidaamkaas ayaa keenay inuu siyaado senate(ka) xilligii Julius, samaynta darajooyin cusub, xafiisyo la abuuray; mana ahayn in dib u habayn lagu sameeyay cadaalada laakiin ay ahayd in taageerayaal cusub loo helo xukunka kaligii taliska, soo koob, marka la gaaro meel iyadoo la marayo in garab la siiyo si weyn ama si yar taasoo lagu helayo faa’iidooyin waawayn ama yar yar daaquudka hoostiisa, waxaa la helayaa

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

dad badan oo daaquudnimadu siinayso fursad dheeri ah marka loo fiiriyo kuwa xornimada u arka waxa fiican.

Iyadoo saa tahay marka ninka xukunka haya uu iska dhigo kaligii taliye, qaranka inta haraaga ah ee sharta wada - kama wado tuugta ama kuwa gacmaha go,an kuwaasoo jamhuuriyadda gudaheed aan muhiim ahayn shar iyo khayrba- laakiin kulli kuwa musuqmaasuq awgii u gubanayo hankoodana yahay iimaan darri qayral caadi ah, kuwaasi oo ku soo urura taageerana si ay uga helaan qaybtooda boobka inay iska dhigaan suldaano yaryar ee ka hooseeya daaquudka wayn. Sidanay u dhaqmaan burcadda berriga iyo badda ee caanka ah: qaar baa waddanka soo sahmiya, kuwa waxay bursadaan musaafiriinta; kuwa waxay u jiifaan iyagoo gabanaya, kuwo waxay sahamiyaan waxa soo socda, kuwa dadkay dilaan, kuwa way dhacaan inkastoo ay ku kala duwan yihiin darajada, qaarkood yihiin heer hoose, kuwana yihiin kaapo qamarji, haddana majiro mid kaliya oo aan dareensanayn inuu shuraako kula jiro boobka, haba ugu yaraatee dabagalkeeda. Waxaa la hubaa inay dhacday burcad badeedkii Sicily inay tiradooda badatay oo lagama maarmaan noqotay in loo diro Pompey Da Great, oo ay ku soo dareen isbahaysigooda magaalooyin wanaagsan iyo kuwa waawayn oo ay dekedahooda ayka dhigteen meesha ay ku gabadaan markay ka soo noqdaan hawlgalladooda, iyagoo lacag fiican ku bixinaya bakhaarada loo siiyay inay ku xaraystaan waxay soo xadeen.

Sidaas daaquudka wuxuu ku muquuninayaa maxaystadiisa, qaarkoodna isagoo isticmaalaya kuwa kale, sidaas ayuu uga difaacan yahay kuwa hadday rag karmeed ahaan lahaayeen uu ku qasbanaan lahaa inuu iska ilaaliyo, sida marka looxa lakala dhambalayo loo isticmaalo dhambale isla looxa ah. Sidaasay fallaaro tuurayaasha, waardiyeyaasha aysan iyaguba ka fara marnayn inay mar mar ku rafaadaan gacantiisa. laakiin nijaaska yar oo ay dayaceen Ilaahay iyo dadkuba, waa la cadaabi karaa haddii loo ogolaado inuu dadka cadaabo. kama wado kuwa isaga isticmaala ee waxaan ka wadaa kuwa sidiisoo kale ah ee isdhiibay oon waxba iska dhicin karin.

@somalibooks

Saasoo thay, ufiirsiga raggaas sida xanuunka ku jirto ugu adeegaayo daaquudka, si ay u helaan xoogaa faa,iido ah oo ka imaanaysa daaquudnimadiisa iyo muquuninta dadwaynaha, Waxaan la qushuucaa fajaca naxariis darradooda, marmarna waa ka naxaa dabaalnimadooda.

Haddii daacadnimo laga wada yahay, ma noqon kartaa sikasta oon ahayn dabaalnimo inaad ku dhowaato daaquut, waxka dhimaaya xornimadaada waa sida hadalku yahaye, oo hab ku siinaysid adi iyo labadaada gacamood addoonsi? bal hadday hankooda wax yar gees iska dhigaan, ama ay illoobaan daqiiqad iimaan darridooda, ooy is fiiriyaan siday yihiin. Waxay garowsan doonaan si cad in dadka magaalada, beero falatada, ooy cagta hoosteeda galiyaan una la dhaqmaan si ka daran dambiilayaasha ama addoomada, waxay garowsanayaan baan dhahayaa, in dadkaan inkastoo si xun loola dhaqmay haddana marka la isu barbar dhigo iyaga in la dhaamo oo xornimo kufilanna haysta

Taas mala dhihi karaa nolol farxad leh? Maloogu yeeri karaa nolol? Ma wax ka liita xaaladaas baa jira, uma dhahayo nin karti badan ama xitaa dhalasho sare leh, laakiin si sahal nin caqli saliim ama kudar qofkasta oo weji rag leh? Bal xaaladee baa ka kharriban noloshan, oo aadan waxba dhihi karin waa waxaagii, ood ka helaysid qof kale quudin, awooda wax lagu sameeyo?, qofka jidhkiisa? iyo qofka noloshiisa?

Weli raggu waxay aqbalaan addoonsi, si ay u helaan maal; oo ka dhigan inay wax uun helayaan markaysan sheegan karin inay naftooda leeyihiin ama in qofiba yeelan karo daaquudka hoostiisa hal shay oo uu ku magacaaban yahay. Saas oo ay tahay waxay u dhaqmaan sidii inay hantida leeyihiin oo

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

illoobaan inay yihiin kuwa siiya ninka xukunka haya awoodda qofkasta uu kaga xayuubiyo waxkasta isagoon u dhaafayn hal shay qofku u aqoonsan karo inuu leeyahay qof kale.

Waxay ogaanayaan waxa kaliya ee ragga u cabiidiya daaquudka arxan darraddiisa ay tahay hantida; Taasoo haysashadeedu tahay danbiga ugu xun ee laga galo, ciqaabtuna ayba gaari karto dil; taasoo uusan u jeclayn waxba siduu lacagta u jecel yahay, uuna hantida ka baabi'iyo maalqabeenka, kuwaasoo hortiisa u yimaada sida kawaanka, wayna buuxaan oo bararsan yihiin taaso ku kallifaysa in daaquudku laqanyoodo.

Gacan yarayaashan maaha inay nasoo xusuusiyaan kuwa maalka ka helay daaquudyada sida kuwa waqti kadib markay meel wax dhigteen daaquudka uu ka qaatay naf iyo maalba; waa inaysan ku xisaabtamin imisa ayaa helay hanti farabadan, laakiin eegaan imisaa weli haysata. Hadaan imtixaano taariikhda qaddiimiga ah ama si sahlan waqtigaan ku jirno, waxaan arkaynaa si cad siday u badan yihiin kuwa sida foolxumada ku jirto u helay dhegta amiirka – iyagoo ka macaashaya fulaynimadooda ama ka faa,iidaysanaya nacasnimadooda – oo uu markii danbe cirib tiray isla amiirkii; inkastoo bilowga gacan yaruhu diyaar iska ahaa inuu hormariyo dantiisa, haddana markii danbe waxay heleen waxyaabo aan marna is waafiqi karin taasoo u keentay burbur.

Hubaal dadka saa u tirada badan waa jiraan kuwo marar la lahaa xiriir kuwa sida xun u xukuma, waxaa jira kuwa fara ku tiris ah ama siday tahayba kuwaasoo aan dareemin cadaawada daaquudka ee iyaga ku foororta, markii horena u nuuxnuuxsaday in kuwa kale la dhaco, sida badan markay iyagu tujaar noqdeen bililiqystay kuwa kale, garabna ka helaya daaquudka difaaciisa, ayay is arkaan ugu danbayn inay isaga taajir ka dhigayaan iyadoo la istimaalayo hantiday boobeen.

Xitaa ragga karaamada leh – hadday marmar dhacdo in daaquud uu ka helo nin sidaas ah uuna sharaf u hayo, sababtuna tahay waxaa ka ifaya suubanaan iyo karaamo, kuwaasoo ku curiya qaddarin xad leh xita kuwa ugu sharaysan - nin karmeedyada qudhood, waxaan oranayaa inaysan ka leex leexan karin inuu soo rito cudurka guud ayna dhakso u dareemayaan cawaaqibta daaquudka.Seneca, Burrus, Thrasea sadexdan rag oo ah rag aad u wanaagsan, heerkoodu sarreeyo, ayaa ugu filan xusuusin nasiib darradii ku dhacday. Labo kamid ah aad ayay ugu dhawaayeen daaquudka, oona mas'uuliyad lagu go'ay ku hayeen gacmahooda maamulayeenna howlihiisa, labadaba wuu qaddarin jiray wuuna jeclaa

@somalibooks

Midkood siiba sheegasho gaar u ah buu saaxiibtinamadii ka dhigtay, isagoo sarreeyihiisa wax bari jiray markuu ilmaha ahaa. Haddana saddexdaan dhimashadooda axmaqnimada ah ayaa caddayn ugu filan aaminnida yar oo qofku siin karo saaxiibtinimada ka sharta wax ku xukuma. Runtii maxaa laga rajayn karaa qof laabtiisa ay la saluugsan tahay nacayb gaaray heer uu dadkiisa necbaado, kuwaasoo maxaa kale ooy sameeyeen inay isaga adeecaan maahane? Sababtuna tahay ma yaqaan sida wax loo jeclaado ugu danbayna faqiir buu ka dhigi ruuxdiisa oo uu dudumin Empirekiisa.

Ka dhulka fala, farsamayaqaanka, si kasta oo loo addoonsado way gutaan waajibaadkooda, markay sameeyaan wixii loo sheegay; laakiin kaligii taliyaha wuxuu arkaa rag xodxodanaya, baryaya inuu ixsaan u sameeyo, oo samaynaya in ka badan wuxuu waydiisto.
Raggaas kuma qasbanayn kaliya inay amarka adeecaan; waa inay kusii talagalaan wuxuu rabi karo; inay qanciyaan waa inay saadaaliyaan wuxuu rabo; waana inay isku daaliyaan, naftooda dhibaan, shaqo isku dilaan dantiisa awgeed, ooy aqbalaan wixii hawadiisa ah sidii inay tooda tahay, iyagoo u dayacaya doorashadooda tiisa, qalloocinaaaya shaqsiyadooda, kharribaayana dadnimadooda; waa inay dhaksho ugu

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

dheg taagaan kelmedihiisa, luuqayntiisa, farataagiisa, eegmadiisa. Yaysan yeelan il, lug ama gacan aan u dheg nuglayn inay u jawaabto wuxuu jeclaysto ama aan raadinayn fikirkiisa.

Hadda hadii qofku ku doodo in raggan ay ku dhaceen sharaf darri, oo sababtu tahay waxay rabeen inay u macaamilaan si sharafi ku jirto, bal ha eego si deggan kuwa kale oo aad ugu dhow daaquutka, wuxuu arki in kuwa uu soo dhawaystay oo naftooda si sharaf dhac ah ku dabarayay aysan waxba dhaamin.

Yaa weligii maqlay jacayl loo qabo qof iyo dareen sii jireen ah, yaa weligii akhriyay nin si daran ugu xiran naag sida Nero iyo Popaea? Haddana isaga ayaa gacmihiisa ku sumeeyey. Agrippina, hooyadiis waxay dishay ninkeedii Claudius si wiilkeeda Nero u dhaxlo boqortooyada, in wiilkeeda la mahadiyo ma aysan ka hakan ama ay culayskasta isu saarto; haddana wiilka sidaas ah, iyada ka soo farcamay, boqorkeeda ah, iyadu gacanteeda kor ugu qaaday, markuu ka gaabiyay wax badan, ugu danbayna iyada dilay. Waa run qofna ma diidayo inay istaahishay ciqaabta , hadday ka iman lahayd cid kale oon ahayn gacanta wiilkeeda ay iyadu dunida keentay, amaba la iska yiraa si saraaxad leh ruux aad uga doqonsan Emperorka Claudius kaasoo aad ugu xirnaa xaaskiisa Messalina, taasoo uu isagu gacanta u galiyay kuwii iyada dilay? Nacasnimada daaquudka waxay ka dhigtaa inuu awoodi waayo wanaag; laakiin si aan la garan karin markuu ula macaamilo si axmaqnimo kuwa isaga aadka ugu dhaw wuxuu bannanka soo dhigayaa caqligiisa yar haduu jiro.

Waxa la ogyahay guud ahaan, waa hadalka daaquudka kale kaasoo eegaya qoorta xaaskiisa, naag uu aad u jeclaa oo u muuqatay la,aanteed inuusan noolaan karin, uu ku xoodaamiyay faalladan layaabka leh: “ Qoortaan quruxda badan waa la goyn haddaan amarka bixiyo”. Taasaa keenaysa inta badan kaligii taliyayaashii berigii hore ay ku dhinteen gacanta kuwa iyaga ugu dhow, oo arkaya siday thay daaquudnimada, aan isku hubi karin waxa nafta daaquudku damcayso, maadaama aysan isku aamini karin awoodiisa. Sidaas ayaa Domitian uu Stephen u dilay, Commodusna waxaa dishay mid kamid ah minyarooyinkiisa, Antoninus na Macrinus u dilay, iyo sidaasaana kulli kuwa kale loogu dilay si taas la mid ah oo rabash iyo dagaal ku jiro

Dhabtu waa daaquudka run ahaantii lama jecla, isna wax ma jecla. Saaxiibtinimada waa kelmed qiima badan, shay karaamo badan; kama dhex unkanto ilaa dadku yihiin kuwa dabeecad leh, xididdana ma yeelato ilaa is qadarin loo sii maro; waxay ku kortaa maahan naxariis ee waa daacadnimo. Waxa uu isugu halleeyo hal saaxiib, midka kale waa inuu ogyahay karaamadiisa: saaxiibtinimo ma jiri karto hadday meesha taallo axmaqnimo, hadday jirto daacad darro, hadday jirto cadaalad darro. Iyo meelaha ay isku ursdaan kuwa sillan waxa ka buuxa shirqool kaliya; baqdin baa isku haysa; saaxiibo maaha waxay yihiin danbi wadaagayaal kaliya.

Inkastoo ay suurto gal noqon karto, weli waxaa aad u adag in laga helo daaquudka saaxiibtinimo run ah; iyadoo kor looga qaaday kuwa kale, oo uusan haysan wehel, wuxuu is arkaa inuu mar hore ka gudbay heerkii saaxiibtinamada, taasoo run ahaan laga helo sinnaanshaha, si ay u horumarto iyadoon dhutin, ay qasab tahay in labada lugood isku mid yihiin. Taasay ku timid in tuugadu is sharfaan (ama sida lagu soo warbixiyay) markay qaybsanayaan waxay soo xadeen; way siman yihiin oo waa rafiiqyo; haddaysan iska helin ugu yaraan way is tixgaliyaan kumana wiiqaan awoodooda muran.

Laakiin kuwa daaquudku ku dhow weligood ma dareemayaan ammaan, kaba sii yar oo sababtuna tahay wuxuu ka bartay inuu awood badan yahay oo aysan awooddiisu xad lahayn, xag sharci ama waajibaad. Saasuu ku noqonayaa qof ku xisaabtama rabistiisa kaliya inay caqligal ka dhigayso waxkasta, uuna sarreeye u noqdo qofkasta uusan jirin cid la siman. Sidaas daraadeed waxay u muuqataa wax laga naxo, iyadoo la hayo intaasoo tusaale oo ay khatartu weligeed xaadir ahayd, haddana qofna kuma welwelo

@somalibooks

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

inuu u tacaamulo waayeelnimo, kuwa kale dartood, intaasoo ay jiraan kuwo ka dabanaagaynaya ka xukunka haya, majiro hal qof oo leh waaya aragnimada iyo maskaxda uu ku u yiraahdo sida sheeka carruurredka dawacada ku tiri libaaxa iska dhigay inuu jirran yahay: " Waan inaan ku faraxsanaano inaan godkaaga galo oo aan ku qaddariyo; laakiin waxaaan u jeedaa xayawaan raadkoodii meesha galay, hal mid oo ka soo baxayna raadkiisii ma hayo.

Kuwan sillan waxay arkaan bigbigta daaquudka maaliyadiisa, markaasay ku wareeraan dhaldhalaalkeeda aadka u fiican. Iftiinkaan uu soo jiitay dartiis, way ku soo dhawaanayaan iyagoon ogaanayn kuna siqayaan holac aan ka gaabinayn inuu gubo. Sidoo kale u soo jiitay Saatirka indhaha adag ee sheeko-carruureedka ku xusan kaasoo uu soo dajiyay Promotheus, isha ka qaaday markii ugu horraysay dab, la noqotay wax qurux badan oo uu markaa dhunkaday, kuna gubtay; sida Tuscan ka gabayaagoodii uu ina xusuusiyay, mothka damac ku jiro ayuu u raadiyaa holaca, maadaam uu ifayo, markaasuu dareemaa tayadiisa kale, gubashada.

Intaa kudar, xitaa qirashada kuwa kudhow daaquutka inay mar mar ka baxsadaan gacmaha ay u adeegaan, Ammaan kama aha xukumaha soo daba gali kara. Hadduu fiican yahay waa inay ka jawaabaan wixii lasoo dhaafay oo ay gartaan in cadaalad jirto; haduu xun yahay wuxuu u ekaanayaa sarreeyahoodii ugu danbeeyey, isaguna wuxuu lahaanayaa qaar ay isu dhow yihiin, kuwaasoo inta badan aan ku qanci doonin jagooyinkii kuwii ka horreeyey, laakiin ku adkaysanaya inta badan maalkooda iyo noloshooda.

Ma la heli karaa qof, kaasoo ku sugan xaaladahaa khatarta ah, aanan haysan ammaan ku filan, uu weli han ku jiro inuu buuxiyo booska jabku ka danbeeyo uuna adeego, isagoo ay sugayso khataraha sarreeyahaas halista ah? Ilaahaygii fiicnaa, maxaa rafaad ah, maxaa naftii hurenimo ay u baahan tahay! Inaad maalinkasta qaban qaabiso in aad raalli galiso hal qof, iyo weliba adigoo ka baqaya si aadan qof kale uga baqin, oo markasta is ilaalinaysid, dhegaha furan yihiin, ka walaacsan xaguu kaaga imananyaa nabarku; inaad shirqoolada iska ilaaliso, inaad dabin iska ilaaliso, inaad wajiyada eeg eegto dadka wehelka kuu ah si aad u soo saarto calaamado ah inay ku khiyaamaynayaan, inaad qof kasta u dhoola cadayso, oo aad uga baqdo kulligood sidii inay ku dilayaan, inaad hubiso inuusan qofna ahayn cadaw qofna ahayn saaxiib la isku hallayn karo; markasta tusaya waji farxadi ka muuqato iyadoo ay jirto wadne dareen ku jiro, uusan ahaan karin mid faraxsan isagoo aan ku dhiirranayn inuu noqdo mid murugaysan.

@somalibooks

Si kastaba ha ahaatee way leedahay qanaacad marka la imtixaano waxa ay ka helaan rafaadka , horumarka ay kala soo baxaan dhibka noloshooda silleysan. Sida dhacda dadku kuma eedeeyaan daaquudka sharta silcinta, waxayse mas'uuliyadeeda saaraan kuwa isaga uu taladooda raaco; Dadku waxay ku tartamaan xitaa beerfalatada, xitaa kuwa ciida roga, inay sheegaan magacyada gacan yarayaasha, darsaan danbiyadooda, iyo inay kumanaan cay dusha uga tuuraan, aflagaado iyo habaar.

Inkaartooda, iyo dhaartoodaba waxay lid ku tahay shaqsiyo; ay dusha uga tuurayaan mashaqada iyo nasiib darrada ku habsatay; iyo gaajada haysa; iyo hadday ay mar mar tusaan qadarin, xitaa isla daqiiqadaas laabtooday caradu ololinaysaa, waxayna uga anfariiran si kabadan ta bahalada. Tanay tahay guusha iyo sharafta ay haystaan gacan yarayaasha kuwa ugu cad cad, kuna helaan adeega ay dadka u sameeyaan, hadday awoodi lahaayeen inay jarjaraan iyagoo nool miiskay garaaci lahaayeen intaa in ka badan, iyadoo badhgo' ku tahay cadhada ay u hayaan. Oo xitaa marka gacan yarahu uu dhinto kuwa nool kama caajisaan inay magacooda tirtiraan kuwan dadqalatada ah, iyagoo isticmaalaya kumanaan qalin, uguna jarjaraya sumcaddooda qurubyo yar yar kumaan buug iyo maqaallo oo ay weligood ciqaabi doonaan markay dhintaan ka dib sifada shaydaanimada ay u noolaayeen darteed.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Aan halkaa ka barano inta weli waqti jiro, aan baranno inaan wanaag samayno. Inaan indhaha samada u taagno, sharafteena awgeed, jacaylka xaqa awgeed, ama si waaya aragnimo leh haddaynu ka hadalno jacaylka iyo ammaanta Alle, kaasoo ah marqaatiga aan khasaarayn ee camalkeena, iyo garsoore caadil u ah khaladkeena. Kolley aniga waxaan aaminsanahay inaan saxsanahay maadaama aysan jirin wax Ilaahay deeqda badan liddi ku ah sida daaquudnimada – Waxaan aaminsanahay inuu cadaabta meel gaar ah uga diyaariyay inuu ku ciqaaabo daaquutyada iyo kuwa danbiga la wadaaga.

@somalibooks